



Marna **maaha** khaladkaaga in qof kale uu dhibaato kuu gaysto.
Mar kasta waxaad helaysaa qof ku caawin kara.
U sheeg qof halkaan ka shaqeeya ama u sheeg qof wayn oo aad ku kalsoon tahay.



HSE waxay leedahay Xeerka Difaaca iyo Faya Dhawrka Ubadka.

Xeerkaan ayaa u sheegaaya dadka ka shaqeeya HSE waxa ay samaynayaan haddii ay ka cabsi qabaan badqabkaaga...



...ama haddii adiga ama qoyskaagu u baahan ahay caawimaad.

Dadka ka shaqeeya HSE ayaa u baahan inay gacan ka gaystaan ilaalinta badqabka ubadka.



Dadka halkaan ka shaqeeya ayaa kala hadli kara qoyskaaga waxa ay ka walwalsan yihiin , haddii ay badqab leedahay in sidaan la sameeyo.

Haddii dadka ka shaqeeya halkaan ay ka walwalsan yihiin in qof uu dhibaato kuu gaysanaayo ama in aadan badqab haysan, waxay ka codsan doonaan dadka ka shaqeeya Tusla inay ku caawiyaan adiga iyo qoyskaaga.



Dadka ka shaqeeya **TUSLA - Wakaalada Ubadka iyo Qoyska** hayaa caawiya ubadka, dhalinta iyo qoysaska.
Waa shaqadooda inay ilaaliyaan badqabka carruurta.

Sidee ayay dadka ka shaqeeya Tusla kuu caawiyaan?



Qof ka shaqeeya Tusla ayaa kula hadli doona si ay u xaqiijiyaan inaad badqabto.

Waxay sidoo kale la hadli doonaan dadka qaybta ka ah nololshaada si ay u hubiyaan sida ugu fiican ee ay kuu caawin karaan adiga iyo qoyskaaga.



QR CODE SCANNING